

10 TALO OO LAGU JOOJIN KARO GARDARREYSIGA

NEWCOMER
PARENT
RESOURCE
SERIES

Way kugu adkaan kartaa in aad si deganaan leh uga jawaabtid markii ay caaruurta u dhaqmaan si gardarreysi leh, lakiin waxaa muhiim ah in aad xasuusato in inta badan caruurta yaryar sidaa ay u dhaqmaan markii ay doonayaan in ay ku muujiyaan nafsadooda ayna tahay sida keliya ay yaqaanaan.

Tobanka talo ee hoos ku qoran ayaa waxay kaa caawin karaan inaad si deganaan leh oo joogto ah ula dhaqanto dabeecada gardarreysiga leh. Adigoo noqonaya qof la jeclado, degaansho iyo dulqaad leh, waxaad ka caawin kartaa in canugaaga uu dareemo amaan iyo xasilooni marka aad hagaysid dabeecadooda iyo xadadka u samaynsid. Waqti gudihiisa, waxaad awood u yeelan kartaa inaad ka hortagtid dabeecadaha gardarada leh inay dhacaan ugu horeyntii.



1. Yeelo rajooyin macquulgal ah oo waxa ilmahaaga uu qaban karo iyo waxaa uu awoodin inuu qabto. Ogoow in carruurta ay u baahan yihiin inay si tartiib tartiib ah ay u bartaan is-xakamaynta.
2. Yeelo qorshe cad ah oo sida aad ula macaamili doonto gardarradooda.
3. Hubi ina ilmahaagu uu ogaado in uu sameeyay wax dhib leh. (tusaale., dhufashada xanuun ayay leedahay.)
4. Tusi canugaaga sida kalee ay u dhaqmi karaan si ay u helaan waxa ay doonayaan ama u baahan yihiin. Ammaan dadaalkooda.
5. Muuji ama tusi dabeecadda aad rabto. Tusi canugaaga sida aad rabto inay u dhaqmaan.
6. Waqti la qaado canugaaga. Ku dar ilmahaaga marka aad wax sameyneyso. Demi telefishanka iyo taleefanka gacanta si ay wadajoogistiinu u noqoto mid farxad leh.
7. Dhaqdhaqaaqa jirka yareey marka uu canugaaga uu aadka u faraxsan yahay ama daalan yahay.
8. Si joogto ah ka dhiga dabeecadaha aad ka filayso, laakiin noqo qof dabacsan marka uu canugaaga uu daalan yahay, gaajaysan yahay ama walwalsan yahay.
9. Raadi waqti oo maalin kasta jimicsi aad ku samaysaan (tusaale ahaan, orodka, boodboodka, fuulista, qoob-ka-ciyaarka, qulqulka).
10. Noqo qof degan, oo xasiloon, wanaagsan oo jecel canugiisa si kasta ha noqotee sida ay u dhaqmayaan.

Booqo cmascanada.ca/cnc/parents wixii macluumaad dheeraad ah oo waalidiinta laba luuqadlaha ah



SUPPORTING CHILD CARE IN THE SETTLEMENT COMMUNITY / SOUTIEN DE LA GARDE DES ENFANTS DANS LA COMMUNAUTÉ DE RÈGLEMENT

Funded by: Immigration, Refugees and Citizenship Canada / Financé par : Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada